



Talo iyo macluumaad su'aalo kasta leh oo
ku saabsan socdaalka iyo is-dhexgalka

SOMALI

Talo

Waxaan bixiinaa talo iyo macluumaad bilaash ah oo ku xusan luqado kala duwan muhaajiriinta, xirfadleyda iyo muwaadiniinta Swiss ee ka yimid gobollada Bern Mittelland, Emmental iyo Oberaargau haddii ay qabaan wax su'aalo ah oo la xiriira socdaalka iyo is-dhexgalka.

Waxaan sinaa adeeggayadeena sida meesha lagala xiriira is-dhexgalka kuna mataleya Agaasinka Caafimaadka, Bulshada iyo Is-dhexgalka ee Kanton Bern (GSI).

Iyada oo ka mid ah afarta qaybood ee lagala soo xiriira is-dhexgalka ee Canton Bern waxaan sidoo kale talo siineynaa muhaajiriinta ka yimid waddanka dhowaan oona noo soo gudbiyay anaga bulshada halka ay ku nool yihiin sida waafaqsan sharciga is-dhexgalka (Berner Modell)..

Waxaan sidoo kale aqbalnaa howlooyinka shaqo ee mushaharka ah oo ka yimaad dhinacyada saddexaad (adeegyada bulshada, carruurta iyo adeegga ilaalinta dadka waaweyn (KESB) iwm.) si loo siiyo talo iyo taageero shaqsiyaadka, lammaanaha iyo qoysaska.

Talo Furan

ARRIMAHA AAN KU CAAWIN KARNO

- Su'aalaha ku saabsan xuquuqaha socdaalka, tusaale ahaan ku saabsan degaanaanshaha, dejinta, dhalashada, digniinta/shuruudaha, hoos u dhigista, cayrinta, dib u mideynta qoysaska iyo kiisaska adag iwm.
- Barashada luqadda iyo shahaadooyinka luqadda
- Iskaashiga/guurka, qoyska iyo carruurta
- La tacaalida mas'uuliyiinta iyo sida ay u shaqeeyaan
- Rabshadaha, cunsurinimo iyo takoorka
- Tababar iyo waxbarasho dheeri ah
- Caafimaadka
- Caymiska bulshada
- Shaqo
- Guriyeynta
- Dhaqaalaha

Waxaan ku siin karnaa talo toos ah oo luqadaha soo socda ah: Carabi, Tigrinya, Farsi, Ruush, Isbaanish, Talyaani, Faransiis, Ingiriis iyo Jarmal. Tarjumaadaha waxaa loo habeyn karaa luqado kale.

Ujeeddada taladani waa in la helo xalal halkaas oo diiradda lagu saarayo ilaha qof kasta oo talo raadiya, si loo fududeeyo helitaanka qaab dhismeedka taageerada guud iyo adeegyada takhasuska leh iyo in kor loo qaado fursadaha loo siman yahay.

Dhammaan la-taliyeyaasheenna waxay ku xiran yihiin waajibka ah inay ilaashadaan sirta xirfadeed iyo sidoo kale xeerarka la xiriira asturnaanta xogta.

Waxaan bixinaa talo furan maalmaha Isniinta ilaa Khamiista meela kala duwan si qof kasta ula xiriiro markii ugu horeysay si ay u soo gudbiyaan wixii cawasho ah oo ay u weyddiidaan su'aalo ama u ogaadaan macluumaadka. Tani waxay sidoo kale noo oggolaaneysaa inaan qiimeyno sida ay baahiyahooda deg-deg u yihiin.

Kuwani waxay ku dhacaan kulamo talobixin gaaban oo soconaya ku dhawaad 30 daqiiqo midkiiba. Ballamo daba-gal dheer ayaa markaa loo habeyn karaa si loo bixiyo talo dheeri ah, taageero iyo caddaymo.

Waxaan sidoo kale talo ku bixinaa taleefoonka maalmaha Isniinta ilaa Khamiista waxaana sidoo kale nagala soo xiriiri karaa iimaylka.

Talo iyo taageer dheeri ah

Talo lagu siiyay sida waafaqsan sharciga Is-dhexgalka (Berner Modell)

Waxaan siin karnaa dadka muhaajiriinta ah ee dhawaan wadanka yimid talo aad u faahfaahsan ka dib kulankoodii ugu horreeyay ee bulshada halka ay ku nool yihiin.

Waxaan go'aamineynaa meesha muhaajiriinta cusub waxaana siinnaa ayaga taageero marxalad kasta oo is dhexgalkooda ah.

Talo / taageero iyadoo ku mataleysa ururada kale

Waxaan dadka siinnaa talo iyo taageero anagoo matalayna ururada kale ee ku saleysan howl qoraal ah iyo caddeyn ka hor ujeedooyinka, kharashyada iyo ballanqaadka la filayo (tusaale. taageerada qoyska).

Faahfaahinada xiriirka iyo macluumaad dheeri ah

isa – Fachstelle Migration

Speichergasse 29
3011 Bern

031 310 12 72
beratung@isabern.ch
www.isabern.ch

Waqtiyada furitaanka

isa Bern

Speichergasse 29, 3. Stock
3011 Bern

Isniin arbaco iyo khamiis	2 galabnimo – 5 galabnimo	talo furan
Isniin – Khamiis	10 subaxnimo – 12 duhurnimo	talo taleefoon 031 310 12 72

Talo ee iimaylka beratung@isabern.ch

isa (c/o Interunido)
Murgenthalstrasse 11
4900 Langenthal
Talaado

2 – 4 galabnimo talo furan